



Aduunyadu waa macaan cagaaran, Ilaahayna idinkuu idiin dhiibay, wuxuuna fiirin waxa aad ku samaysaan, aduunyada iska jira dumarkana iska jira

Abii Saciid al Khudri-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Nabiga ka wariyey-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- inuu yiri: "Aduunyadu waa macaan cagaaran, Ilaahayna idinkuu idiin dhiibay, wuxuuna fiirin waxa aad ku samaysaan, aduunyada iska jira dumarkana iska jira, fitnadii reer beni israa'iil lagu fitneeyey ee ugu horaysay dumarkay ahayd".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu cadeeyey inay aduunyadu dhadhan macaan tahay, aragana cagaar u tahay, dadkuna way ku kadsoomayaan, oo isku sii daynayaan macaankeeda, hamigiisa ugu wayna iyadu ka dhigayaa. Ilaahayna -isagaa nusqaan ka hufane-wuxuu inaga yeelay in qaarkeenba qaarka kale uga danbeeyo aduunyada, si uu Ilaahay u eego waxa aynu samaynayno, inaan isaga adeecayno iyo inaan ku caasiyeyno. Ka dib wuxuu yiri: ka digtoonaada inaad ku sirtoontaan raaxada aduunyada iyo quruxdeeda, oo ay idin gaarsiiso inaad ka tagtaan wuxuu Ilaahay idin faray, oo aad ku dhacdaan wuxuu idinka reebay. Fitnada aduunyada ugu wayn ee ay waajibka tahay in laga digtoonaadaa waa fitnada dumarka, iyadayna ahayd fitnadii ugu horaysey ee reer bani Israa'iil ay ku dhacaan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3053>

